Taariikhda Abiibakar Sidiiq
Qaybta Labaad

الحمد لله رب العالمين والصلاة والسلام على أشرف الأنبياء والمرسلين نبينا محمد وعلى آله وصحبه أجمعين

Mahad oo dhan Alaah iska leh Rabiga caalam ka abuurey Allaha ha amaano nabigeena sharafta badnaay anbiyada kan ugu fadliga badan&anbiyada lasoo direy dhamaantood

Fadligii Abiibakar Sidiiq Radiyalaahu Canhu

>**Abiibakar sidiiq** رضي الله fadligiisa lama soo koobikaro laakiin waxaan ka xusi doona in kamid ah Xadiis imaam Axmed soo saarey !!!‼!!! ! Allaha karaali noqodu In Rasuulkeena رسُول الله صلى الله عليه وسلم yiri ^^ **Weli maal iima anfacin siduu maalka Abiibakara ii Anfacay ^^ Markaasa abiibakar ooyoyey oo yiri " Rasuulkii Alloow aniga & Maalkeyga macidkale ayaa leh adiga mooyaanee"** Maalka abiibkar wuxuu ahaa (haystey maal ahaan) **40** (Afartan) kun oo diinaar maalintuu islaamey abiibakara !!! رضي الله dhamaan wuxuu ku baxshey jidka alle maalintii uu hijroonaayey waxaa baaqi (Ka hartey) u ahayd lacagtiisa **5** (Shan) kun oo diinaar kaliya marka waxaad arkeysaa in abiibakar **35** kun oo diinaar diinta islaamka ugu deeqay inay kor noqoto waxaa nasiib daro in ah dad magac muslin sheeganaayo in ay abiibakar caayaan iyagoo u arka in cayda abiibakar ilaahay loogu dhowaanaayo sida shiicadda raafidada marka waa in laga digtoonaada 3aqiidada baadilka ah dad badan soomaaliyeedna aysan waxbadan kala soconin fikirka shiicada.

>Imaam Tirmidi wuxuu soo saarey xadiis **Abuu hureyra** عَنْ أبي هُرَيْرَةَ !!! رضي الله Allaha karaali noqodu In Rasuulkeena رسُول الله صلى الله عليه وسلم yiri << ***Ma jiro qof agteyda gacan (abaal) ku leh ilaa waan siiyey abiibakar sidiiq maahinee isaga agteyda gacan (abaal) ku leeyahay allaah ayaa u gudaayo maalinta qiyaamaha horey maal iima anficin sida maalka abiibakar ii anfacay*****">>**

>Imaam Bukhaari & Imaam muslim soo saarey oo ay ka wariyeen Sahal Binu Sacad !!! رضي الله wuxuu yiri '' Khilaaf ayaa dhex marey reer **bani camar binu cowf**,markaas Nabiga maqley oo aadey waan salaad duhur kadib ayeey ahayd si uu usoo heshiisiiyo wuxuuna ku

yiri **bilaal ibnu rawaaxa** !!! رضي الله hadii salaada lagaaro oo aan imaanin waxaad usheegtaa abiibakar !!! رضي الله dadka salaada ha tujiyo" Marka xadiiska waxaa ku cad fadliga abiibakar ee umadda nabi maxamed maadama ummada imaam looga dhigay oo ay kudaba tukadaan .

>Imaam Bukhaari Imaam muslim soo saareen oo ay **Caisha**رضي الله عنها tiri markii xanuunkii geeridii rasuulka cusleysey ayaa bilaal u yimid isagoo ogeysiinaayo in salaadii la gaarey markaasuu rasuulka yiri amra abiibakar salaada ha tujiyo " markaasey Caisha tiri abiibakar waa qof qalbi jilicsan ee booskaada haduu galo oohin & khushuuciisa badan sidaa darteed ee **cumar** amar rasuulkii alloow **'''** markaasuu rasuulka yiri amra abiibakar salaada ha tujiyo**'''** Markaaseey **xafsa** رضي الله عنها utagtey caisha oo ku tiri u sheeg rasuulka si salaada cumar u tujiyo markaasey xafsa u sheegtey arinkii markaasuu rasuulka *صلى الله عليه وسلم* yiri waxaad tihiin **sawaaxiba yuusuf** oo uula jeedo haweenkii nabi yuusuf u heshiiyeen.

>**Abiibakar sidiiq** !!! رضي اللهFadligiisa waxaa kamid in isaga waxaa gacantiisa ku soo islaamey koox saxaabadii **10** (**Tobanka**) jannada loogu bishaareeyey qaar kamid ah oo ay kala ah:
1-Cismaan Binu Cafaan 2-Cabdiraxamaan Ibnu Cowf 3-Zubeyr Ibnu Cawaam 4- Dhalxa Ibnu Cubeydilaah 5- Sacad Binu Abii Waqaas.

>**Abiibakar sidiiq** !!! رضي اللهFadligiisa waxaa uu xoreeyey adoomo badan oo diinta islaamka ay qaateen darteed loo ciqaabi jirey waxaana kamid ahaay **bilaal** oo adoon u ahaan jirey ***ummaya ibnu khalaf*** oo aad u dhibey abiibakar ayaa iibsadey bilaal kadibna xoreeyey ,Waxaa kale kamid ahayd gabadhii **samiira** oo adoon u ahayd cumar ibnu khadaab inta uusan islaamka soo galin ka hor.***Cumar ibnu khadhaab*** wuxuu dhihi jirey bilaal waa sayidkayga waxaana xoreyeeyey sayidkeena oo uu la jeedo abiibakar.
Samiira waxay ahayd gabdhii adoon u ahayd cumar islaamka ka hor ciqaabtii la ciqaabey darteed ayeey la indho beeshay kadibna Qureeysh waxay yiraahdeen Sanamyaddi **Laata** & **Cuzzaa** ay qureeysh caabudi jireen ayaa indho tirey ,Markaaseey tiri ilaahii الله indho La"aan i dhigay wuu awoodaa in indhahayga ii soo cesho Sey allaah u baryeysey ayaa indhaheeda alaaah الله usoo ceshay markaaseey qureeysh yiraahdeen **''Kaas Waa Sixirkii Muxamed "** oo ay ula jeeda in

Nabi Maxamed صلى الله عليه وسلم sixiroow yahay ka dib abiibakar ayaa **samiira** cumar ka iibsadey oo xoreeyey .Qureeysh waxay dhihi jireen ''hadii islaamka kheyr yahay samiira noogama hor marteen islaanimada '' markaasaa allaah ka jawaabey oo quraan ku soo dejiyey,Hadalada noocan waxaa ku hadla markasta dadka diinta ka hor yimaada laakiin amarkiisa cidna ma hor istaagi karo

>**Abiibakar sidiiq** رضي الله !!! Fadligiisa waxaa kamid ah in uu xoreeyey adoomo badan ilaahayna fadligiisa qaar waxaa looga hadley quraanka kariimka **suuratul Layl &Nuur** oo ay ka mid ahayd **Ummu cubeys** oo adoon u ahayd **Reer BaniiCabdi Shamsi** & Gabadh kale oo adoon u ahayd **Reer Banii Cadiye**.

>Imaam Bukhaari In Rasuulkeena yiri:Qof kii jid ka alle (jihaadka) wax ku bixiya waxaa looga yeeri Albaabada jannada oo waxaa lagu dhahaayaa adoonkii alle waa kan kheyrkaada midkii Ehlusalaadka ah albaabka salaada looga yeeri,midkii Ehlusadaqa waxaa loo yeeri doona albaabka sadaqada,Kii Ehlu soonwaxaa loo yeeri doona albaabka soonka baaburayaan,Abiibakar wuxuu yiri ma jiraa mid looga yeeri doona albaabadaas oo dhan,Rasuulka wuxuu haa wuu jiraa waxaana rajaynaayaa inaad adiga kamid Noqoto .

- **Qaybta 3"aad** Waxay noqon doontaa Inshalaah ***Hijraddii Abuubakar Sidiiq***

Ilaahaan Uga Mahad Celin الحمد لله رب العالمين Oo Ii Fududeeyey Inaan qoro **Taariikhda Khulufaa Rashidiin** oo i Waafijiyey aan Walaaladayda aan Ugu soo Gudbiyo Luuqadda Af Soomaliga Marka Waxay Khaladaad Yeelato Risaaladaan Ama Gaabinah &Luuqada Soomaliga Erayad qaarkood Aan Qeexi waayo Waxay Ka timid Nafteyda & Shaydhaan Waana Uga Toobad Keeni Allaah iyo Rasuulkeena S.c.w Bari Ayeey Kayihiin Naseexadiina Waan U Baahanahay Yaan La iga Iloobin Walaalkasto Ka Faaideysta Ama Akhristo ama Wax Kusii Daro Ilaahay (i weydiiya) iiga Barya Aniga & Labadayda Waalid & Reerkayga In Allaah Na Waafijiyo Tubta Toosan & Khaatimadda Toosan.

Waxaa Qorey : Walaalkiin ***Cabdiladhiif Aadan***
Akhiizubeyr_1@hotmail.com

!!!